

## Baarista Malawadka iyo Mindhicirka weyn ee adeegsiga midabbada



### **OGOW! Warbixin muhiim ah:**

1. Waa inaad faaruqisid mindhicirka hawlgalka ka hor – ka eeg meesha lagu qoray taas. Haddii aan loo bannayn mindhicirka sidii la rabay waxaa dhici karta in aan baaristaan la fulin karin ama ay noqoto mid faa'iido la'aana.
2. Waa inaad cunto-cunistaada wax ka baddashid 5-ta maalmood ee ka horreysa baarista – ka eeg meesha lagu qoray taas.
3. Haddii aad qaadatid dawada dhiigga jilcisa, waxaa dhici karta in dawooyinkaas la yara hakiyo – ka eeg meesha lagu qoray taas.



Lovisenberg Diakonale Sykehus

Lovisenberg Diakonale Sykehus

Medisinsk poliklinikk

Lovisenberggt. 17

Telefon: 2322 5720

Kromoendoskoipi 01-2020 somali



Lovisenberg Diakonale Sykehus

## Waa maxay kromoendoskopi?

Kromoendoskopi waa baaris lagu sameeyo malawadka iyo mindhicirka weyn (koloskopi). Tuubbo loodsamaysa ayaa lasoo mariyaa malawadka, waxaana xuubka gudaha lagu shubaa walax midab leh si ay u sahlanaato in la arko wixii isbeddel ah ee ku dhacay xuubka gudaha ee malawadka iyo mindhicirka weyn.

### U diyaargaroobidda baarista

1. Is-faaruuqinta: **Fiiri warqaddeeda.**
2. Cunto iyo cabitaan: **Fiiri bogga ugu dambeeya**

### Dawooyin iyo jirrooyin kale

Waa inaad na siisaa wixii warbixina oo ku saabsan dawooyin aadan u adkaysan karin, iyo jirrooyin aad qabtid sida xanuunka wadnaha in dhiiggu ka hakado (angina pectoris), cillad wadnaha ah, dhibaatootin dhiig-bax, maadaama ay taasi saamayn ku yeelan karto doorashada hawl-qabadka.

### Dawooyin saameeya muddada dhiig-baxa:

- Haddii aad isticmaashid **Albyl-E**, waad sii wadi kartaa inaad qaadatid ilaa maalinta baarista haddii aan lagu sheegin farriin taas ka duwan.
- Haddii aad isticmaashid **Plavix/Brilique/Efient**, waa inaad nala soo xiriirtid ugu yaraa hal toddobaad hawl-galka kahor.
- Haddii aad isticmaashid **Xarelto/Eliquis/Pradaxa**, jooji 2 maalmood hawl-galka kahor.
- Haddii aad isticmaashid **Marevan**, waa inaad joojisid 3 maalmood kahor hawl-galka iyadoo xinjiroobistana (INR) lagu koontaroolayo shaybaarkayaga. Sidaa awgeed waa inaad timaaddaa ugu yaraan 1 saac baarista kahor adigoo farriintaan ka sheegaya xafiiska qaabilaadda ee Rugta caafimaadka bukaan-socodka (medisinsk poliklinikk).
- Haddii qalliin lagugu geliyey waal-wadneed (hjerteklaff), **waa inaad lasoo xiriirtid rugta caafimaadka** si loo diyaariyo in lagaa beddelo Marevan oo laguugu beddelo Fragmin ka hor baarista.

## Baarista laftigeeda

Baaristu waxay socotaa 1 ilaa 1,5 saacadood. Waxaad dareemi kartaa xanuun hawl-qabad ah inta lagu baarayo. Haddaad u baahatid dawo ku dejisa iyo mid xanuunka yareysa, waa lagu siinayaa. Haddii ay taasi dhacdo waxaa gacanta lagaaga xirayaa caagga xididka ku xiran ee dawada la mariyo.

### Baarista kadib

Haddii lagu siiyey dawada dejisada ah, waa inaad kusii nasatid waaxda 1-2 saacadood baarista kadib. Maalinta lagu baaray baabuur ma kaxayn kartid.

Dhawr maalmood gudahood ayaa dhakhtarkii kuusoo diray baarista loogu sheegi doonaa natiijada baarista. Haddii nudayaal (cad yar) la baarayo lagaa qaaday waxaa uu dhakhtarka kusoo diray ku helayaa jawaabta 4-6 toddobaad kadib.

Soo qaado cunto aad cuni kartid baarista kadib.

### Dhibaatooyin?

Aad bay u yar tahay in dhibi ka timaaddo baaristan adeegsiga midabbada ee walamadka iyo mindhicirka. Marka lasoo goynayo nudayaalka ama la jarayo nabar waxaa dhaawac yari ku samaysmaa xuubka. Aad bay u yartahay inuu dhiig-furan yimaado, laakiin wuu imaan karaa ilaa 3-4 maalmood baarista kadib. Inta badan asaga ayaa iska joogsada.

Haddii uu jiro shaki ah in mindhicirku dhaawacmay, waxaad la xiriirtaa dhakhtarkaaga ama dhakhtarka heeganka waaxda caafimaadka guud ee isbitaalkaan, telefoon [23 22 50 00](tel:23225000)

Dhakhtarka isbitaalku ma qorayo warqadda fasaxa jirrada ee maalinta lagu baaray, laakiin waxaa lagu siin karaa caddayn ah inaad halkaan u timid baaris caafimaad.